

Waa maxay Super Bowl?

- Super Bowl waa mid ka mid ah dhacdooyinka cayaaraha ee ugu weyn ee ka dhaca dunida waana cayaar Mareykanka laga ciyaaro. Sanadwalba Magaalo ayaa lagu qabtaa. Sanadkan waxaa lagu qaban doonaa garoonka Minneapolis ee US Bank Stadium, waxaana laqaban doonaa Malinta Axada ah bisha Febraayo 4 teeda.
- In ka badan 1 Malyan oo qof ayaa la filayaa in ay ka qayb galaan cayaarta ka dhacaysa US Bank stadium. Dhacdooyin iyo xaflado 10-cisho socda ayaa ka bilaaban doona Magaalooyinka Mataanaha (Twin Cities) laga bilaabo Janaayo 26 keeda-Febraayo 4 teeda, 2018.
- Magaalada Minneapolis waxa ay ku hawlan tahay hubinta in 10 kaa cisho ee dabaal-daga ah ee bilaabmi Janaayo 26 keeda ilaa Febraayo 4 teeda, 2018 ay noqdaan kuwa amaan ah, soo dhaweyn leh oo ay jeclaystaan dhamaan dadka degan 13 ka xaafadood ee magaalada, ganacsiyada iyo martiduba.
- Super Bowl Live, waa dabaal degyo bilaash ah oo 10 cisho socda oo horu-dhac u ah cayaarta wayn, kana dhici doonta Mall ka Nicolet ee Downtown ka Minneapolis.
- Super Bowl Experience, waa carwo ururka isku-taga cayaaraha ee NFL loo-yaqaan ay ku soo bandhigi doonaan 26 Jan ilaa Feb. 2 deeda xarunta weyn ee (Minneapolis Convention Center). Tigidhada lagu galana waa \$35.

Wixii akhbaar ah ee kale ee ku saabsan Super Bowl ka eeg shabakadahan soo socda. Akhbaartaasi waxa ay ku qoran yihiin afka Ingriiska. Ka wac Magaalada Minneapolis 311 si lagu siiyo akhbaarta oo afka kaaga ah.

- minneapolisismn.gov/superbowl
- mnsuperbowl.com
- minneapolis.org

Adeegyada Dowlada (Government Services) / Gaadiidka (Transportation)

Adeegyada Dowlada (Government Services)

Magaalada Minneapolis waxaa ka go'an in ay mar walba siiso adeeyo heer sare ah dadk magaalada iyo ganacsiyadaba. Adeegyada magaalada, sida qashin qaadida, dib u isticmaalida iyo aruurinta walxaha orgaaniga ah waxa ay u socon doonaan sidoodii caadiga ahayd xilliga dabaal-dega cayaarta Super Bowl ka.

- Helida wixii akhbaar ah ee dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada Magaalada, Wac 311 ama booqo
- minneapolisismn.gov/superbowl

Xarunta Daryeelka Caafimaadka ee Degmada Hennepin [Hennepin County Medical Center (HCMC)]

- Maadaama tirada dadka Minneapolis ay kordhi doono xilliga Super Bowl ka, Isbitaalka HCMC waxa

uu filayaa in loo keeni doono dad badan oo dhaawacyo iyo xanuuno ku soo gaareen qabowga ama khamri cabida awgeed, iyo inay arki doonaan dad badan oo hargab ama shuban qaba oo loo keeno.

- Iminka, HCMC uma qorsheysna in ay xirto wax rug caafimaad ah ka hor Super Bowl. Hase yeeshee, HCMC waxa ay xiri doontaa rugaha caafimaad ee caadiyan Sabtiyada furan, oo ay ku jirto Addiction Medicine Clinic. Rugta Acute Burn & Wound Clinic waa ay furnaan doontaa.
- Akhbaarta Guud 612-873-3000

Gaadiidka (Transportation)

Magaaladda Minneapolis, Metro Transit iyo ururo badan oo kale oo aan ka wada shaqeynayno cayaarta Super Bowl, waxa ay sameeyeen qorshe cid walbaa ku tagi karo Cayaarta Super Bowl ka Axada, 4ta Febraayo iyo dabaaldegyada Janaayo 26 ilaa Febraayo iyadoon wax carqalad ah oo weyn aanay lakulmin gaadiidka iyo dadku.

Waxyaabaha aad u baahan tahay in aad ogaato:

- Laga bilaabo Bartamaha Janaayo Waxaa la-xiri doonaa wadooyinka ku yaal agagaarka Nicollet Mall, Minneapolis Convention Center iyo U.S. Bank Stadium.
- Laga bilaabo Janaayo 26 ilaa Febraayo 4teeda, Gadiidka Metro Transit ayaa noqon doona kan ugu wanaagsan ee lagu tagi karo Dwontown ka Minneapolis. Waxaa jiri doona kordhin la kordhiyo gadiidka mara wadooyinka muhiimka ah iyo gaadiid gaar u ah dhacdooyinka la xiriira Super Bowlka.
- Tareenada METRO waxa ay u shaqeyn doonaan sidoodii caadiga ahayd ilaa iyo maalinta cayaarta Super Bowl LII oo ah Axada Febraayo ay tahay 4ta.
- Axada, Febraayo 4 ay tahay tareenka METRO Blue Line waxaa bedeli doona basas lacag la'aan ah oo ay raaci karaan dhamaan cid walba, tareenka Green Line ee u-kala shaqeeya Stadium Village iyo Target Field waxaa bedeli doona basas lacag la'aan ah. Ka qayb galayaasha cayaarta Super Bowl waxa ay raaci doonaan tareenada laakiin kusii talo-gal waqti dheeraad ah iney kugu qaadato baaritaanada xaga amniga awgeed.

Akhbaar kale oo dheeraad ah

- Ogow inta aadan bixin: mnsuperbowl.com/transportation
- Ka wac Metro Transit telefoonka ah 612-373-3333 si lagaaga caawiyo hawsha safarkaaga. Waxa ay kugu xiri karaan turjubaan af walba ah.
- metrotransit.org/superbowl
- Ka hel iyadoo af ingiriiska ah aalada la yiraa (smartphone app) ee metrotransit.org/apps

(Hoos: Jidadka lagu taliyey in loo qaato bedelka hoose ee Minneapolis (downtown Minneapolis))



Public Safety

Hay'adaha Sharci Ilaalinta (Law Enforcement)

Dabaal-degyada Super Bowl waxaa lagu arki doonaa ciidan badan oo muuqda oo xadir ku ah. Askarta Booliiska ah ee ka shaqeynaysa waa kuwo ay wax waydiin karaan dadka deegaanku iyo booqadayaasha ka kala yimid aduunka oo dhan, waana kuwo runtii matalaya wanaaga Magaaladeena iyo nawaaxigeedaba.

[Minneapolis Police Department (MPD)] waa hay'ada madaxda ka ah hawl-galada sharci ilaalinta ah oo dhan waxaana la shaqeyn doona 40 hay'adood oo sharci ilaalin ah oo kala duwan, oo ay ku jiraan Ciidanka Ilaalinta Gobolka (National Guard). Hay'adaha caawinaya kuwa Sharci Ilaalinta ee Magaaladu waxa ay xirnaan doonaan dirayskooda. Hay'adahaasi hawl galo iskood ah ma sameyn doonaan ee waxay caawin uun kuwa Minneapolis (MPD).

Adeegyada:

- minneapolis.gov/superbowl
- Wixii akhbaar ah ee dheeraad ah ka wac khadka 311

Gadida Jirka dadka iyo galmo ka ganacsiga (SexTrafficking)

Jir gadida iyo galmo ka ganacsigu waa wax dhaca 365 maalmood ee sannadku ka kooban yahay ee ma aha wax uun dhaca markii dhacdo weyni jirto sida Super Bowl ka.

Hase yeeshee Super Bowl LII, ku waxa ay bixisaa fursad lagu bayaamin karo sida ay Minnesota safka hore ugu jirto dagaalka lagula jiro dhibkan. Sannadihii dhawaa, Magaalada Minneapolis waxay hanti & dadaal ku bixisey la-dagaalanka ka-ganacsiga jirka. Dhalinyaradu waxa ay la-shaqeyeen hay'adaha ilaalinta sharciyada iyo adeeg bixiyaasha gobolka oo dhan si dambiyo loogu soo oogo dadka galma ahaanta ugu takri fala dhalinyarada iyo ku xirida dhibanayaasha arrintan gargaarada ay u baahan yihiin.

Magaaladu waxa ay kala shaqeynaysaa ururada dowlada, kuwa sama falka, taakuleeyayaasha iyo Gudiga Marti Galinta Super Bowl ee Minnesota (Minnesota Super Bowl Host Committee) xeelad lagula dagaalamayo ka-ganacsiga jirka dadka xilliga Super Bowl iyo ka diba. Qodobada ugu waaweyn qorshaha

waxaa ku jira bilaabida olole wacyi galin ah; siyaadinta tababarada la siiyo mulkiileyaasha hudheelada iyo guriyaha la kiraysto; kordhinta ka warqabida dhalinyarada ku sugan goobaha lagu yaqaan jir gadida dadka.

Adeegyada:

- (MN Day One Crisis Line) ee 866-223-1111 ama Fariin: 612-399-9995. Waxaa heegan ku ah 24 ka saac ee todobada cisho ee asbuucii, 365 maalmood ee sannadkii shaqaale loo carbiyey in ay qabtaan warbixinada la xiriira dhibanayaasha dhibku ku soo gaaro ka ganacsiga jirka dadka meel kasta gobolka ha ka joogaane. Dhamaan warbixinada oo dhami waa qarsoodi. Turjumaanana waa diyaar.
- Wac 311 si aad u hesho Akhbaar kale oo ku saabsan gargaarada kale ee Magaaladdu ay bixiso.

Xabsiga Degmada Hennepin (Hennepin County Jail)

- Saacadaha booqashada xabsiga Degmada Hennepin (Hennepin County Jail) waxa ay ahaan doonaan sidoodii hore, laakiin maadaama goobta ay ciriiri noqoneyso, waxaan ku dhiiragelineynaa in dadku ay telephone ka soo wacaan ehelkooda, intii ay imaanlahayeen.
- Bixinta lacagta damaanada ah waxaa laga bixin karaa 24 saac/maalintii oo dhan Xarunta Hennepin County Public Safety Facility, 401 S. Fourth Ave., Minneapolis, MN 55415
- Si aad telefoonka ugu waydiiso su'aalo ku saabsan damaanada la dhigo, ka wac xabsiga 612-348-5112. Diyaarsana magaca iyo taariikhda dhalashada qofka kaa xiran ee lacagta laga dhigayo.
- Hadii ay suurto gal tahay, ha aadin xabsiga maalinta ciyaarta oo ah Axada, Febraayo 4ta ay tahay.